**Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka, 2 Maarso 1972, lamba. 54.**

**Xeer Nidaamiyaha habraaca fulinta Qaraarada Garsooridda fulinta Maxkamadda Badbaadada Dalka.**

## GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu arkay Warqadda koowaad kacaanka;

Marka uu arkay Xeerka 10 Janaayo 1970 lamba. 3 ee ku saabsan dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo isbaddallada ka dambeeyay;

Marka uu arkay Xeerka lamba. 16 ee 2 Maarso 1972 ee lagu dhisay Garsooraha Fulinta Maxkamadda Badbaadada Dalka;

Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo in la soo saaro Xeer Nidaamiyaha dacwadda fulinta qaraarada garsooridda Maxkamadda Badbaadada Dalka;

## WUXUU DEKERETO KU SOO SAARAYA

## CINWAANKA 1AAD

Hagidda Dacwadda, Cinwaanka Fulinta leh, Amarka Sharciga iyo Qeexidda

### Qod. 1
### Qeexidda

Cinwaanka fulinta leh: waa xukunka Maxkamadda Badbaadada Dalka ee lagu caddaynayo amarka Garsooraha Fulinta ee isla Maxkamadda.

Amarka sharciga: amarka la siinayo daynsanaha in uu bixiyo lacagta laga doonayo oo ku siman muddo cayman, haddii kale xoog loogu fulin doono:

Curaarta: waa shay guurto ah ama waxyaaba guurto ah oo la siinayo daynlaha daynta leh.
Rahanta: waa maguurto loo diiwaangaliyo qof dammaanad ahaan daynta uu leeyahay.

### Qod. 2
### Hagidda Dacwadda Fulinta

Dacwadda fulinte ee qaraarada garsoorka Maxkamadda Badbaadada dalka ee ku saabsan xukunnada madaniga waxaa hagaya Garsooraha Fulinta oo ay soo magacowday Maxkamadda Badbaadada.

Dhammaan qaraarada Garsooraha fulinta waa kuwa kama dambaysa.

### Qod. 4
### Caddaynta Awoodda Fulinta

Xukunada iyo dekereetooyinka amarka fulinta ee ku xusan qod. 3 oo leh qiimaha awoodda fulinta qasabka ah, waa in uu kaaliyuhu u qoraa qaabka soo soo socda: “Cinwaankanu in uu leeyahay awooddaa fulinta”, saxiixa qofka qoraya iyo shaabadda Kaliyaha. Caddaynta ku xusan faqradda koowaad waxaa la siin karaa Wakiilka Garyaqaanka Guud ee Dawladda, ama cidda uu si gaara xeerku u sheegayo marka laga wakiil yahay, oo uu ka soo qaybgalay dhinac madaniga oo magaca iyo danaha matalaya ama wakaalad dawladeed oo kale oo dano ka leh iyadoo darafka warqadda lagu tilmaamayo qofka loo soo saaray. Warqadda la soo saarayo Kaaliyuhu waa in uu ku qoraa nuqulka asaalka ee warqadda.

**Qod. 5**
**Caddaymaha kale oo leh Awood Fulinta**

Lama siin karo, sabab la'aan wax ka badan hal caddayn oo leh awood fulin isla hal dhinac.

Wixii kale oo caddayn ah codsadaha ayaa weydiisanaya dhinacayada daneynaya, wixii ku saabsan qaraarada ku xusan qod. 2, Garsooraha Fulinta ayaa dekereeto ku soo saaraya.

**Qod. 6**
**Saamaynta Liddiga Awoodda Cinwaanka Fulinta uu ku Yeelanayo**

Cinwaanka fulinta oo liddiga ku ah qofka geeriyooday wuxuu ku yeelanayaa awood fulineed dhaxaltooyadiisa laga soo bilaaba marka la wargaliyo.

Sanad gudihiis marka laga joogo geerida, ayaa dhaxaltooyada si wada jira iyo si shaqsi ah waxaa la wargalin karaa deegaankii ugu dambeeyay ee marxuumkaa.

**Qod. 7**
**Amarka**

Haddii Xeerku aanu si kale u dhigayn, fulinta khasabka ah waa in ay ka horreysaa in la wargaliyo amarka daynqabaha iyo dhaxaltooyadiisu si shaqsi ah, marka laga reebo xaaldaha ku xusan faqradda koowaad ee qod. sare.

Sikastaba haddii ay daahidda ay dhibaato ka imaanayso, Garsoruhu wuxuu dekereeto ku oggolaan karaa qod. 15. fulin deg-degga iyadoo aan la wargalin daynqabaha.

**Qod. 8**
**Qaabka Amarka**

Amarku wuxuu ka koobanyahay wargalinta bixinta waajibaadka ku qoran cinwaanka fulinta muddo aan ka yareyn toban cisho, iyadoo haddii kale looga digayo in ay xigi doonto fulin qasab ah.

Amarku waa in uu wataa iyado la'aantii uu wax kama jiraan yahay tilmaamaha dhinacyada iyo goobaha ay degganyihiin, waxyaabaha muhiimka u ah amarka fulinta, tirada lacagta la iska doonayo, iyo taariikhda ay dhaqangalayo qoraalka uu kaaliyuhu qoray iyadoo uu saxiixayo dhinaca wax codsanaya.

Amarka waa in uu ka midyahay sidoo kale caddaynta deegaanka iyo doorashada goobta deegaanka dhinaca wax codsaday oo ah xarunta Garsooraha iqtisaaska fulinta leh. Haddii aanay jirin tilmaamahaas, wixii wargalino ah ee xagga dhinaca wax codsanaya waxaa deg-deg u sameynaya Kaaliyaha isla Garsoorahaas.

**Qod. 9**
**Joogsiga Awoodda Amarka**

Amarku wuxuu noqonayaa mid aan awood lahayn haddii, muddo ku siman sagaashan cisho gudahood ee wargalinta, aan la bilaabin fulinta.

Haddii amarka laga keeno is-hortaag muddada waa la hakinayaa waxayna ka bilaabanaysaa tariikhda qaraarka looga gungaarayo is-hortaagga.

**Qod. 10**
**Muddada Gudashada**

Marka laga reebo xaaladda ku xusan faqradda labaad ee qod. 6, lama bilaabi karo fulinta qasabka ah haddii aanay ka soo wareegin toban cisho muddada amarka ku qoran.

## CINWAANKA 2AAD
Xoolatirka Qasabka

### Cutubka 1aad
Xoolatirka Qasabka ee Guud

**Qod. 2aad**
**Hagidda Dacwadda**

Xoolatirka qasabka waxaa hagaya Garsooraha fulinta ee Maxkamadda badadada.

**Qod. 12**
**Dhagaysa Dhinaca Danaynaya**

Marka Xeerku farayo haddii garsooruhu ay la noqoto lagama maarman in la dhagaysto dhinacyada iyo ciddii kale ee danaynaya, isla Garsooruhu wuxuu dekereeto ku muddaynayaa fadhi ay dhinacyada wax loo rahmay, dayn-qabaha iyo ciddii kale oo dano ka leh ay hortiisa yimaadaan.

Dekereetada waxaa wargalinayaa Kaaliyaha.

Haddii ay soo baxdo amaba suurtagal noqoto in dhinacyada qaarkood aanay imaan sababa ka madax bannaan rabitabitankooda, Garsooruhu wuxuu qabanayaa fadhi cusub iyadoo Kaaliyuhu uu wargalinayo dhinaca aan imaan.

**Qod. 13**
**Mamnuucidda soo Dhexgalka Daynlayaasha Gaarka**

Ma soo dhexgali karaan dacwadda fulinta daynlayaasha gaarka oo xuquuq ku sheeganaya hantida dayn-qabaha, xitaa haddii ay sitaan cinwaan fulin leh.

Iyagu xuquuqdooda waxay ka raadsan karaan keliya maxkamadaha caadiga ee maaddda ahan awoodda u leh.

**Qod. 14**
**Qaabka Su'aalaha iyo Tusaalooyinka**

Arjiga iyo codsiga, haddii si kale aanu xeerku u dhigayn, waxaa tiraab ahaan loo jeedinayaa Garsooraha marka fadhigu qabsoomo, ama cabasho laga xareeyo Kaalinta xaaladaha kale.

**Qod. 15**
**Qaabka Qaraarada Garsooraha**

Haddii aanu xeerku si kale u dhigin, qaraarada Garsooraha waxay ku soo baxayaan amar, ka soo bixi kara isla Garsooraha isagoo labaddali karo lagana noqon karo illaa ay fulintu dhacayso.

Wixii la xariira amarka Garsooraha waxaa loo hoggaansanaya qodobada 176, 179 iyo 186 Xeerka Habka Madaniga marka la dabbaqi karo.

**Qod. 16**
**Bilowga Xoola-tirka**

Marka laga reebo xaaladda ku xusan qod. 32, faqradda labaad, xolaha-tirka waxay ku bilaabanaysaa rahanta.

Oggoolaashaha curaarta waxaa weydiisanaya garsooraha fulinta wakiilka Dawladda ama wakaaladda dawladda Garsooraha iyadoo cabashada lagu soo hagaajinayo Kaalinta oo lagu soo lifaaqnyahay cinwaanka fulinta iyo amarka. Marka la wargaliyo amarka, cabashada lama qaban karo haddii aanay dhammaan muddada ku xusan faqradda koowaad ee qod. 6. Garsooruhu wuxuu hubinayaa qaabka saxnaanta cinwaanka iyo amarka, wuxuuna dekereeto ku oggolaanayaa rahanta.

**Qod. 17**
**Galka Xoola-tirka**

Kaaliyuhu, marka loo keeno codsiga oggolaashaha rahanta, wuxuu ka samaynayaa dacwad kasta ee xoola-tirka gal lagu rido waraaqaha garsooruha, Kaaliyaha, Gaarsiiyaha iyo waraaqaha ay keenaan dhinacyada iyo dadka danaynaya.

**Qod. 18**
**Qaabka Rahantata**

Rahanta waxay ka koobantahay amar la siinayo dayn-qabaha in uu ka maago wax kasta oo wax u dhimi kara dammaanadda daynta hantida iyo miraha la xoola-tirayo.

**Qod. 19**
**Bixinta Lacagta loo Dhiibayo Gaarsiiyaha**

Dayn-qabuhu wuxuu baajin karaa qabashada haddii uu u dhiibo Gaarsiiyaha lacagta iyo kharashaka dacwaddu si loo siiyo cidda xaqa u leh, iyadoo lacagta la baxshay la soo celi karo haddii aan la bixin.

**Qod. 20**
**Lacag u Baddalidda Qabashada**

Markastaba inta ka horreysa iibka, dayn-qabuhu wuxuu ka codsan karaa Garsooraha Fulinta in uu lacag loogu baddalo shayga rahantata loo hayo oo u dhiganta kharashka iyo daynta lagu leeyahay.

Garsooraha wuxuu amar ku bixinayaa, marka uu dhagaysto dhinacyada, lacagta lagu baddalayo: wuxuuna amarayaa in shayga laga qaado rahanta saaran, lacagta la baxshana lagu baddalo.

**Qod. 21**
**Yaraynta Rahantata**

Marka qiimaha hantida la rahmay ay ka badantahay tirada kharashka iyo daynta lagu sheegay qodobka sare, Garsooraha, haddii uu codsado dayn-qabahu iyo xitaa xaafiis ahaan isla markaana uu dhagaysto dhinaca rahanta loo qabtay, wuxuu yareyn karaa rahanta.

**Qod. 22**
**Isbiirsiga Qaababka Xool-tirka**

Dhinaca waxa codsaday wuxuu ku dacwoon karaa qaabab kala duwan ee xoola-tirka qasabka ee xeerku dhigayo, hasayeeshe dayn-qabuhu wuxuu weydiisan karaa Garsooraha, kaaso ku go'aaminaya amar aan racfaan lahayn, isagoo caddaynaya qaabka lagu xoola-tirayo.

**Cutubka 2aad**
Xoola-tirka Hantida Guurtada ee uu hayo dayn-qabaha

**Qod. 23**
**Oggolaashaha Rahanta**

Dhinaca doonaya in uu socodsiiyo xoola-tirka hantida guurtada ah, waa in xitaa si kooban u tilmaamaa, inta lagu jiro xaalada qod. 14 hantida uu leeyahay dayn-qabaha rahanta la galinayo iyo goobta ay yaalliin.

Garsooruhu marka uu oggolanayo si waafaqsan qod. 14, wuxuu u dirayaa Gaarsiiyaha u xilsaaran Xaafiiska, ama Sarkaal ka tirsan ciidanka Boliiska haddii goobta fulintu ka dhacaysaa ay ka duwantahay xarunta Xaafiiska.

Nuqul ka mida dekereetada waxaa loo dhiibayaa Kaaliyaha Xaafiiska Maxkamadda socodsiinaysa.

**Qod. 24**
**Raadinta Shayga la Rahmayo**

Gaarsiiyuhu, oo sita nuqul ka mida dekereetada kor lagu soo sheegay qodobka sare, wuxuu ka raadin karaa shayga la rahmayo guriga dayn-qabaha iyo goobaha kale oo uu isagu leeyahay.

Wuxuu kaloo ka raadin karaa dayn-qabaha dadkiisa, isagoo ilaalinaya taxaddarka habboon ee lagu dhowrayo sharafta.

Ugu dambayntii wuxuu ka raadin karaa shayga la rahmayo goobo aanu dayn-qabuhu lahayn, hasayeeshe uu isagu si toosa u leeyahay.

Haddii Gaarsiiyuhu la kulmo dhibaato isagoo eegaya duruufaha, wuxuu dalban karaa haddii loo baahdo kaalmada ciidanka nabadgalyada.

Dhinca wax loo rahmayo wuxuu iqtiyar u leeyahay in uu joogo goobta rahanta.

**Qod. 25**
**Shayda Guurtada oo aan Sina Loo Rahmi Karin**

Ka sokow waxyaabaha xeerarka ay caddeeyeen in aan la rahmi karin, lama rahmi karo:

1) waxyaabaha muqddaska ah iyo kuwa loo adeegsado cibaadada;

2) dharka, gogosha, sariiraha shayada guriga ama jikada, oo lagama maarmaan u ah dayn-qabaha iyo qoskiisa isaga la nool;
3) cuntada iyo shidaalka wax lagu karsado oo ah dayn-qabaha masruufkiisa wixii ku siman hal bil;
4) qalabka, agabka iyo buugaagta, oo lagama maarmanka u ah wax qabadka, xirfaddiisa, farshaxanka ama mihnadda dayn-qabaha;
5) hubka iyo shayada uu dayn-qabuhu ay waajib tahay in uu keydsado si uu ku guto shaqada waajibaadkiisa guud;
6) sharraxaadda, qiimaha leh, buugaagta, diiwaanada iyo guud ahaan qoraallada qoyska, haddii aanay ka mid ahayn shayo uruursan.

**Qod. 26**
**Shayada Guurtada Gaar ahaan la Rahmi karo**

Shayada uu milkiilaha beerta uu haysto hawsha beeritaanka iyaga waxaa la rahmi karaa iyagoo ka gooniya maguurtada keliya markii hanti guurto kale la waayo, sikastaba Garsooruhu, marka uu weydiisto dayn-qabaha lana dhagaysto daynlaha, wuxuu ka dhaafi karaa rahanta, isagoo soo saaraya amar aan racfaan laga qaadan karin, waxyaabaha ka mida kuwa kor lagu soo sheegay oo lagama maarmaan u ahtacabka beerta, ama xitaa wuxuu u oggolaan karaa adegsiga, iyagoo rahman, isagoo ka taxaddaraya baaqinimada iyo jirtaankooda.

**Qod. 26**
**Shayada la Rahmi karo Duruufaha Waqtiyada Qaarkood**

Miraha aan weli soo go'in ama dhulka aan laga soo qaadin lama rahmi karo iyagoo ka gooniya maguurtada ay ku yaalliin haddii aanay gaarin lixda toddbad ee ugu dambeeya ee ka horreeya muddada bisaaylkooda caadiga, haddii dhinaca wax loo rahmay aanu qaadayn kharashka badan ee ku baxa keydintooda.

**Qod. 27**
**Shayga la Rahmayo**

Rahanta, haddii aanay dhib u keenayn dhinaca wax loo rahmay, waa in uu ka doortaa shayada uu dayn-qabuhu tilmaamay.

Sikastaba Gaarsiiyuhu waa in uu doorbidaa lacagta caddanka ah, shayada qiimaha leh iyo kuwa ay la noqoto in ay fududahay helitaankooda.

**Qod. 28**
**Qaabka Rahanta**

Gaarsiiyuhu wuxuu ka diyaarinayaa hawlgalladiisa maxdar kaasoo uu ku muujinayo amarka ku xusan qod. 17, wuxuu tilmaamaya shayga la rahmay isagoo qiyaasaya qiimaha, iyo warbixinta amarada la bixiyay ee ku saabsan haynta iyo xafidaaadda shayga la rahmay, si waafaqsan qodobka soo socda.

Haddii dayn-qabuhu aanu joogin, amarka waxaa la siinayaa qoyska ama cidda shayga u xilsaaran, xaafiiska ama urur-hantiyeedka, haddii aanay ka yareyn da'da affar iyo toban jirka oo aanay caddayn karti la'aantiisa, iyadoo loo dhibayo ogaysiiska amarka la siiyay dayn-qabaha. Haddii dadkaas la waayo, Gaarsiiyuhu wuxuu ku dhajinayaa ogaysiiskaas iridda maguurtada la

rahmayo. Maxdarka oo uu wehliyo dekereetda lagu oggoladay rahanta, waa in Gaarsiiyuhu geeyaa Kaalinta Garsooraha shan cisho gudahood marka hawlagalka la qabtay.

**Qod. 30**
**Haynta iyo Xafidaadda Shayga la Rahmay**

Gaarsiiyuhu waa in uu u dhiibaa Kaaliyaha lacagta iyo cinwaanada amaahda iyo shayada qiimaha weyn leh oo la rahmay.

Wixii ku saabsan xafidaadda waxyaabaha kale Gaarsiiyha wuxuu u soo qaadayaa goob si guud wax loogu keydiyo ama uu u dhiibo qof haya, kaasoo noqon kara xitaa mid ka mida dhinacyada, haddii aanay suurtgal ahayn in cid kale loo dhiibo isla markaana aanu dhinac kale diidin.

Qofka loo dhiibayo ayaa qaadaya xilka xafidaadda guurtooyinka la rahmay oo loo diyaarshay garsoorka iyadoo aan la isticmaali karin haddii aanu garsooruhu oggolaan.

**Qod. 31**
**Waqtiga Samaynta Rahanta**

Rahanta lama samayn karo maalmaha la caddeeyay sharciyan in ay yihiin kuwa aan la shaqayn, sidoo kale saacadaha ka bacdi 6 maqribnimo, haddii aanu garsooruhu oggolaan. Rahanta la bilaabay saacadaha la sheegay waa la sii wadi karaa illaa laga dhammeystiro.

**Qod. 32**
**Tallaabooyinka Iibinta**

Marka ay dhammaato tobonka cisho ee lagu keenayo maxdarka rahanta, Garsooruhu wuxuu dekereeto ku muddaynayaa fadhi ay ka soo wada qaybgalaan dhinaca wax loo rahmay, dayn-qabaha, iyo ciddii kale oo dano kale.

Kaaliyuhu wuxuu muddaynta fadhiga wargalinayaa dhinacyada iyadoo warqadda ogaysiiska lagu dhajinayo Xaafiiska Maxkamadda horteeda.

Dhinacyadu fadhiga waxay ka samayn karaan doodo ku saabsan waqtiga iyo qaabka iibku u dhacayo waxayna soo jeedin karaan, muddo cayiman wixii is-hortaaga ee qoraallada fulinta, oo xitaa ay ku jiraan waxyaabaha ku saabsan rahmidda hantida iyo saxnaanta qaabka cinwaanka iyo amarka.

Garsooruhu wuxuu go’aan ka gaaraya is-hortaagga isagoo soo saaraya amar aan racfaan laga qaadan karin wuxuuna amrayaa iibka iyadoo la naadinayo, isagoo qabanaya maalinta, saacadda, goobta iyo qiimaha laga bilaabayo, islamarkaasna magacaabaya qofka iibka loo xilsaarayo.

**Qod. 33**
**Iibka Miraha ku Yaalla ama Hantida Guurtada Gaarka ah**

Iibka miraha ku yaalla lagama guri karo iyagoo aan gaarin waqtiga bisaylka. Waxyaabaha lagu sheegay qod. 26 Garsooruhu wuxuu u wareejin karaa iibka waqtiga ay la noqoto lagama maarmaan in ay ku habboontahay urur-hantiyeedka beeraha.

**Qod. 34**
**Iibka Rahanta**

Marka laga reebo xaaladaha gaarka oo ku xusan Xeerka Madaniga, xoola-tirka shayada rahanta la galiyay waxaa la raacayaa qodobada xeer-nidaamiyahaan, hasayeeshe xoola-tirka markasta waa in uu ka horreya amarka.

Iibka waxaa la weydiisan karaa iyadoo amarku aanu ka horreyn, xaaladdahaaso kale qofka danta kale waa in uu hortagaa Garsooraha iibka la weydiistay inta lagu jiro muddada amarku dhaqangalka yahay.

**Qod. 35**
**Bandhigga Amarka Iibka**

Amarka iibka waa in Kaaliyuhu ku dhajiyaa iridda toban cisho ka hor maalinta loo qabtay Xaafiiska Garsooraha, iridda Guddoomiyha Degmada iyo goobta suuqa dadweynaha iibku ka dhacayo.

Garsooruhu wuxuu amri karaa haddii ay la noqoto qaabab kale oo lagu soo bandhigo.

**Qod. 36**
**Qaabka Iibka**

Qofka loo xilsaaray iibka, marka u horreysa waa in uu sameeyaa, isagoo oo la joogo qofka loo dhiibayo, aqoonsiga shayada la iibinayo, isagoo barbar dhigaya tilmaamaha ku jira maxdarka ee rahanta.

Shayada la iibinayo waxaa la bixinayaa mid-mid ama xirmo gooniya, hadba sida curfigu yahay, iyadoo lagu saleynayo qiimaha uu Garsooruhu gooyaya.

Qofka ku guulaysta waa in uu islamarkiiba bixiyaa qiimaha la gaaray iyo kharashka diiwaangalinta maxdarka, haddii kale, dalabkiisa waxaa loo qaadanayaa mid wax kama jiraana waxaana noqonaya mid saxa dalabka ku xiga ee gaara qiimaha ugu sarreeya. Hawlgallada la qabto u qaybsanaha iibka wuxuu ka diyaarinayaa maxdar kaasoo si deg-dega loo geyn doono Kaalinta Garsooraha iyadoo ay wehliyaan lacagta ka soo baxday iibka iyo midda looga baahanyahay diiwaangalinta maxdarka.

Kaaliyaha ayaa qabanaya diiwaangalinta maxdarka.

**Qod. 37**
**Naadada Cusub**

Haddii shayga naadada la galiyay la iibsan waayo, Kaaliyuhu wuxuu wargalinayaa Garsooraha, kaaso, marka uu dhagaysto dhinacyada haddii loo baahdo, wuxuu muddaynayaa naado cusub taaso la oggolyahay dalab kasta oo la keeno.

Shayada dahabka iyo qalinka sina laguma iibin karo qiima ka hooseeya qiimaha ku dhexjira.

**Qod. 38**
**Qoondaynta Lacagta ka soo Baxda**

Marka la soo xareeyo maxdarka iibka iyo lacagta lacagta ka soo baxday, Garsooruhu, wuxuu dekereeto ku muddaynayaa fadhi oo kan wax soo codsaday lagu siinayo lacagta u sugnaatay.

Ugu yaraan toddoba cisho ka hor fadhiga, Kaaliyuhu wuxuu wargalinayaa dhinacyada. Kadib marka la qanciyo kan wax codsaday iyo kharashka fulinta, haddii lacag soo harto, Garsooruhu wuxuu u celinaya qofkii laga soo qaaday.

**Cutubka 3aad**
Xoola-Tirka Dhinaca Saddexaad

**Qod. 39**
**Qaabka Rahanta**

Dhinaca doonaya in loo rahmo amaah uu leeyahay dayn-qabaha ama shayga uu leeyahay dayn-qabaha oo uu hayo cid saddexaad, waa in uu ku tilmaamaa, dacwadda sida ku xusan qod. 15, shayada iyo lacagta uu doonayo in wax lagu socodsiiyo.

Garsooruhu, wuxuu isla dekereeto ku oggolaanayaa rahanta uu hayo dhinaca saddexaad shayada iyo lacagta la tilmaamay, waxaa la farayaa, dhinaca saddexaad in aanu bixin midkaas amar la'aan. Isla dekereetadaas waxaa codsadaha, dayn-qabaha iyo cidda saddexaad lagu amrayaa in ay isaga hor yimaadaan, si dhinaca saddexaad uu u bixiyo caddaynta ku xusan qod. 43 oo uu kala doodo dhinacyada kale.

Nuqul ka mida cabashada iyo dekereetad ayaa Kaaliyuhu wuxuu u dirayaa, dayn-qabaha iyo cidda saddexaad, ugu yaraan toban cisho kahor fadhiga la qabtay.

Isla waqtigaas Kaaliyuhu wuxuu wargalinayaa dhinaca wax codsaday.

**Qod. 40**
**Dammaanadda Curaarta iyo Rahanta ee Amaahda la Rahmay**

Haddii amahda rahman dammaanad loo haysto, qofka haysta waa in aanu bixin isagoo aan amar ka helin garsooraha.

Haddii amahda rahman ay dammaanad ku jirtay, qoraalka rahanta, waa in qofka waxa codsaday ku qoraa buugaagta dhulka.

**Qod. 41**
**Amaahahaa aan la Rahmi karin**

Lama rahmi karo amaahaha masaaruufa ama amaahaha noocyada kaalmada dhamada lagu helo, jirrooyinka oo ay baxshaan wakaaladdaa santuuqa caymiska, ee wakaaladaha kaalmada iyo hay'adaha samafalka.

Lacagta dadka gaarka lagu siiyo mushaar ahaan ama gunooyin kale ee ku saabsan xiriir shaqo ama hawl la qabto, oo ay ku jiraan kuwa lagu helo sababa la xariiro ruqsaynta, iyo mushaarooyinka iyo lacaga kale, sidoo kale hawlgabka iyo lacagaha kale e nasashada oo uu bixiyo maamulka dadwladda ama wakaalad kasta ama hay'ad daryeel ama xitaa mid qaabilsan

ilaalinta maamulka dawladda, waxaa la rahmi karaa illaa kala bar, marka la xisaabiyo lacagta saafiga ee soo harta.

### Qod. 42
### Waajibaadka Qofka Saddexaad

Laga soo bilaabo maalinta la soo wargaliyo qoraalka ku xusan qod. 39, qofka saddexaad waxaa xil ka saaranyahay, qayb ahaan shayada iyo lacagta laga doonayo, waajibaadyada xeerku saarayoa xafidaha.

### Qod. 43
### Caddaynta Qofka Saddexaad

Caddaynta laga bixinayo fadhiga, qofka saddexaad – qof ahaan ama wakiilkiisa gaarka – waa in uu caddeeyaa lacagta lagu leeyahay ama shayada uu hayo iyo marka uu lacagta bixinyayo ama dhiibayo.

Haddii ay tahay lacag ay leeyihiin wakaaladaha ku xusan qod. 41, qofka bixinaya caddaynta, waa in uu xitaa caddeeyaa tirada lacagta, marka la xisaabiyo saafiga soo haray, lacagta qofka shaqaalaha sida joogtada uu u qaato marka loo eego xiriirkiisa shaqada, mushaarka, abaalmarinta ama hawlgabka.

Qofka saddexaad sidoo kale waa in uu caddeeyaa xayiraadaha horay loo sameeyay. Xaaladdaaso kale Garsooruhu wuxuu amrayaa in la iska soo xaadiriyo garsoorha hortiisa xitaa kan wax loo xayiray.

### Qod. 44
### Maqnaashaha Caddaynta Qofka Saddexaad

Kan saddexaad haddii aanu imaan fadhiga la muddeeyay, Garsooruhu wuxuu dib u dhigayaa fadhi kale, kaasoo Kaaliyuhu uu wargalinayo dhinacyada isagoo waraaq u diraya. Haddi qofka saddexaad aan imaan xitaa fadhigaas ama inta yimaado uu diido in uu caddayn bixiyo, Garsooruhu aamusnaantiisa wuxuu u qaadanaya sidii isagoo baxshay caddayn oggolaasha ah, wuxuuna amar aan racfaan lahayn ku soo saarayaa qaraarada ku xusan qod. 46 iyo 47.

### Qod. 45
### Doodda Dhinaca Saddexaad

Haddii caddaynta dhinaca saddexaad ay dood ka dhalato, Garsooruhu wuxuu dekereeto ku hakinayaa dacwadda fulinta, wuxuuna ku dhaqaaqaya oogidda iyo ka garsooridda waxyaabaha doodda laga keenay qaabka caadiga ee dacwad qaadista.

Haddii meeshaas laga xaqiijiyo jiritaanka xaqa uu dayn-qabuhu ku leeyahay dhinaca saddexaad, Garsooruhu wuxuu amar ku muddaynayaa fadhi ay dhinacyadu ka soo qaybgalaan si loo sii wado fulinta.

**Qod. 46**
**Iibka Shayada uu Hayo Dhinaca Saddexaad**

Dhinaca saddexaad haddii uu caddeeyo ama la caddeeyo in uu hayo shayo uu leeyayhay dayn-qabuhu, Garsooruhu wuxuu ku tallaabsanayaa iibka si waafaqsan qodobka 32 iyo kuwa ku xiga.

**Qod. 47**

**Qoondaynta Daynta**

Hadddii dhinaca saddexaad caddeeyo ama la caddeeyo in lagu leeyaya dayn si deg-degga loo gudikaro ama la bixin karo muddo aan ka badanay sagaashan cisho, amase ay yihiin lacago kolba xilli diyaar noqon karta oo ku lug leh xiriirada lagu soo sheegay faqradda saddexaad ee qod.39, Garsooruhu wuxuu qoondaynayaa bixinta lacagtaas, marka laga reebo canshurta ay Dawladdu ama Wakaaladaha Dawladdu khuseeya illaa la gaarsiiyo inta laga doonayay. Xaaladaha ku xusan faqradda saddexaad ee qod.39, dhinaca saddexaad waa in uu si deg-degga u wargaliyaa Garsooraha wixii joogsi ama hagadyo ku yimaada xiriirka shaqada ama wixii sababo kale oo keeni kara joogsiga ama hakadka lacagaha la siinayo dayn-qabaha.

**Qod. 48**
**Curaarta iyo Rahanta ee Dammaanadda Daynta**

Haddii daynta loo hayo curaar dammaanad ah, Garsooruhu, wuxuu amrayaa in shayga curaarta in la siiyo qofka loo qoondeeyay.

Haddii daynta ay saarnayd rahan, Garsooruhu wuxuu amar ku bixinaya qararaarka qoondaynta lagu qoro buugaagta dhulka iyadoo hawshaas uu qabanayo dhinaca wax codsaday.

**Cutubka 4aad**
Xoola-Tirka Maguurtada

**Qod. 49**
**Qaabka Rahanta**

Marka dhinaca wax soo codasaday uu doonayo in loo rahmo hanti maguurto ah oo uu leeyahay dayn-qabaha, waa in inta ay socdan xaaladaha ku xusan qod. 15 si saxan u tilmaamaha maguurtda iyada ah, isagoo caddaynaya cayntooda, goobta laga helayo, tirada diiwaanada dhulka, haddii ay qoranyihiin ugu yaraan saddex ka mid soohdiintooda. Cabashada, ka sokow cinwaanka fulin, waan in la soo raaciyaa amarka iyo shahaadada qoraalka diiwaangalinta saaran hantida la rahmayo.

Dekereetada lagu oggolaaanayo rahanta, Garsooruhu dayn-qabaha wuxuu siinaya amarka ku xusan qod. 17.

Rahantu waxay dhacaysaa iyadoo Kaaliyuhu wargalinayo Dayn-qabaha cabashada iyo amarka. Isla marka ay dhacdo wargalinta, Gaarsiiyaha waa in uu ku soo xareeyaa Kaalinta nuqulka asalka ee qoraalka.

**Qod. 50**
**Diiwaangelinta Rahanta**

Shan cisho gudahood marka la xareeyo cabashada iyo dekereetada la wargaliyo si waafaqsan qodobada la soo sheegay, Kaaliyuhun waa in uu diiwaangeliyaa qoraalkaas, isagoo geynaya xaafiiska buuugaagta dhulka ee shaqada ku leh nuqul la tasdiiqiyay. Ilaaliyaha waxaa u sugnaaday abaalgud lagu caddaynayo dekereetada Garsooraha.

**Qod. 51**
**Qaabka Ilaalinta**

Dayn-qabaha iyo dhinaca saddexaad ee loo magacaabay ilaaliyaha waa in ay tiriyaan waxaa ay maamulayaan.

Iyaga waxaa ka reeban kireeynta maguurtada rahman haddii aanu Garsooruhu u oggolaan. Garsooruhu haddii uu u oggolaado dayn-qabaha wuu sii degenaan karaa magggurtada rahman, isagoo degaya meelaha loo asteeyay oo lagama maarmaanka u ah isaga iyo qoyskiisa. Haddii dayn-qabaha uu caddeeyo inaanu haysn wax kale oo uu ku noolaado. Garsooruhu wuxuu xitaa ka siin karaa xoolaha masruuf, inta lagama maarmaan u ah illaa laga mutaysanayo. Oggolaashaha lagu sheegay faqradaha sare, Garsooraha ayaa bixinaya marka uu dhagaysto dhinacyada iyo ciddii kale ee dana ka leh.

**Qod. 53**
**Tallaabooyinka lagu Qabanayo Iibka**

Marla ay ka soo waregto tobanka cisho rahanta, Garsoruhu, wuxuu dekereto ku muddaynayaa fadhi ay ka soo wada qaybgalaan dhinaca wax loo rahmay, dayn-qabaha, iyo dhinacyada kale ee danaynaya.

Kaaliyaha wuxuu wargalinayaa dhinacyada fadhiga la muddeeyay isago waraaqo u qoraya ogaysiiskana lagu dhajinayo Mmaxkamadda horteeda laguna faafinayo Faafinta Rasmiga.

Garsooraha wuxuu kaloo amri karaa qaabab kale ee baahin haddii uu doono.

**Qod. 54**
**Fadhiga lagu Oggolaanayo Iibka**

Fadhiga la muddeeyay dhinacyadu waxay ka soo jeedin karaan fikrado ku saabsan waqtiga iyo qaababka iibka, waana in ay ku soo jeediyaan waqtiga loo qabtay keliya, wixii is-hortaag ah oo fulinta laga keeno oo xitaa ay ku jirto arrimaha ku saabsan rahanta hantida iyo saxnaanta qaabka cinwaanka iyo sidoo kale amarka. Qiimaha lagu bilaabayo iibka iyo qaybinta xirrmooyinka hantida la iibinayo dhinacyada ayaa si wada jira go’aan uga gaaraya, haddii kale Garsooraha ayaa goynaya, isagoo xitaa la magacaabi karo qof khabiira.

Garsooraha ayaa go’aan ka gaaraya wixii is-hortaaga sida ku xusan faqradda 1aad isago ku soo saaraya amar aan racfaanla lahayn wuxuuna amrayaa in maguurtada lagu iibiyo naado si waafaqsan qodobada la soo sheegay.

**Qod. 55**
**Waxaa ku Jira Qaraarka wax lagu Iibinayo**

Garsooraha, marka uu dhagaysta khabiir haddii loo baahdo, wuxuu amar ku soo saarayaa:

1) In iibka loo sameeyo mid ama xirmooyin badan;
2) qiimaha laga bilaabayo naadada;
3) maalinta iyo saacadda naadada;
4) qaddarka dammaanadda tira aan ka yareyn tobankiiba hal qiimaha bilawga iyo qiyaasta kharashka iibka;
5) waqtiga lagu keenayo wixii curaar ah;
6) halbeegga ugu yare ee kororka kasta lagu samaynayo;
7) muddada, oo aan ka yareyn lixdan cisho ee mutaysiga, in qiimahana lagu soo xareynayo iyo qaabka xaraynta;
8) muddada ay tahay in ay dhaxeyso samaynta qaabka faafinta naadada iyo sidoo kale wixi kale ee faafin ah.

**Qod. 56**
**Dadka Naadada loo Oggolyahay**

Cid kasta oo aanu ku jirin dayn-qabaha, waxaa loo oggolyahay innuu ka qayb qaato naadada, waxaase shardi aha in uu bixiyo dammaanad iyo curaar u dhiganta qiyaasti qiimaha iyo kharshka iibka si waafaqsan qod. 55.

Lacagta waa in uu bixiyo shaqsiga ama wakiilkiisa sita wakaalad gaara. Haddii kan qiimaha gaaray aanu mutaysan, dammaanadda, curaarta iyokharashka waa loo celinayaa marka naadadu xiranto.

**Qod. 57**
**Qaabka Naadada**

Naadadu waxay ka dhacaysaa Garsooraha hortiisa oo ah meel fagaara ah. Lacagta la gaaryo mid saxa ma noqonayso haddii aanay ka badnayn qiimaha bilawga ama qiimaha la gaaray ee isaga ka horreeyay sida lagu tilmaamay xaaladaha iibka. Kadib qiima kasta marka la gaaro Garsooruhu wuxuu u gudbayaa kan ku xiga, iyadoo midkasta kan kale ay u dhaxeyso hal daqiiqo, saddex jeer marka loo soo bandhigo ka qaybgalayaasha naadada si loo kordhiyo qiimaha la gaaray iyadoo aan la xaddidayn qiimaha ugu sarreeya ee la gaari karo, waxaa maguurtada ku guulaysanaya kan ugu dambeeya ee gaara qiimaha ugu sarreeya.

Qiima kasta oo la gaara wuxuu baaba'ayaa marka la gaara qiima ka sii sarreeya, xitaa kaas haddii la caddeeyo in aanu waxba ka jirin.

**Qod. 58**
**Caddaynta Deggenaanshaha iyo Doorashada Deggenaanshaha Mutaystaha**

Qofka mutaystay waa in uu caddeeyaa goobta uu degganyahay ama meesha uu u deggenaanshaha oo ah xarunta Garsooraha iibka sameynaya.

Haddii kale wargalinta iyo xariirka waxaa samaynaya Kaalinta.

**Qod. 59**
**Qiima Gaarista Naadada ka dib**

Marka ay dhacdo naadada, waxaa la samayn karaa qiima lagu qaadan karo toban cisho gudahood, hasayeshe sax noqon mayso haddii qiimaha la gaaray aanu ka sarreyn boqolkiiba labatan qiimahii horay naada loo gaaray.

Qofka qiimaha gaarayaa waa in u soo gudbiyaa Kaalinta caddayn ku saabsan qiimaha u gaaray iyo dammaanadda oo aan ka yareyn tobonkiiba hal qiimaha uu gaaray iyo qiyaasti wixii kharash ah ee iibka.

Mutaystaha ku-meelgaarka waxaa lagu dhaqayaa qod. 56, faqradda ugu dambaysa ee isla qodobkaas.

**Qod. 60**
**Naadada Cusub**

Markan ay dhammaato muddada lagu keenayo kororsiimaha qiimaha lagu soo sheegay qodobka sare, Garsooruhu wuxuu amar ku muddaynayaa fadhi lagu qabanayo naado cusub oo ka bilaabanaya qiimaahii ugu sarreeyay oo la gaaray. Kaaliyaha wuxuu dekereetada ku faafinayaa qaabka ku xusan qod. 53 mutaystaha gaaray qiimaha ugu sarreeyay.

Naadadu waxay u dhacaysaa qaabka ku xusan qod. 57 iyadoo mutaysiga qiimaha ugu sarreeya uuu noqonayo mid kama dambays ah.

**Qod. 61**
**Bixinta Lacagta**

Mutaystuhu waa in uu soo shubaa lacagta iyadoo saafi ka aha dammaanadda uu horay u bixiyay, muddada iyo shuruudaha ku qoran amarka iibka si waafaqsan qod. 55.

**Qod. 62**
**Wareejinta Hantida la xoola-tiray**

Marka la bixiyo qiimaha lacagta, Garsooruhu wuxuu ku dhawaaqayaa dekereetada uu ku wareejinayo qofka mutaystay hantida la xoola-tiray, isagoo ku soo celinaya tilmaamaha nuxurka amarka wax lagu iibiyay, isal markaasna ku amraya Kaaliyaha diiwangelinada rahanta iyo ku qorista diwaanka maguurtada.

Dekeretada waxaa kaloo ku jiraya amarka ah in dayn-qabaha iyo ilaaliyaha amarka ah in faraha ka qaadaan maguurtada la iibshay.

**Qod. 63**
**Bixin la'aanta Mutaystaha**

Haddii lacagta aan lagu bixin muddadii iyo qaabkii loo qabtay, Garsooruhu wuxuu dekereeto ku caddaynayaa in uu mutaysigii buray islamarkaana dammaanaddii la bixiyay la waynayo ganaax ahaan, wuxuuna qabanayaa fadhi cusub oo dhinacyada lagu dhagaysto si waafaqsan qod. 53.

Kaaliyhuhu, wuxuu kaloo wargalinayaa dekereetada mutaystaha isagoo ogaysiiska ku soo bandhigaya si waafaqsan qod. 53.

Wixii ku saabsan naadada cusub, waxaa la raacaya sida ku xusan qod. 54 iyo kuwa ku sii xiga.

Haddii lacagta ka soo baxda, laguna daro dammaanadi la lala wareegay ay ka yartahay tii naadadii hore, Garsooraha, marka uu dhagaysto dhinacyada danaynaya, wuxuu dekereeto ku xakumaya mutaystaha wax bixin waayay inuu bixiyo faraqa.

## Qod. 64

## Tallaabada Haddii Naadadu aanay Dhicin

Marka ay ka soo wareegto toban cisho naadada la cidleeyay, Garsooruhu dekereeto ayuu ku amrayaa dhinacyada in ay yimaadaan.

Fadhiga la qabto, wuxuu ku amrayaa in la qabto naada cusub. Markaan dambe Garsooruhu wuxuu jidayn karaa xaalado iib kala duwan iyo qaabab kala duwan ee bandhig, isagoo goynaya qiimaha laga bilaabayo oo ka yar shantiiba hal kii hore.

Haddii naadada cusub ay dhici waydo, Garsooraha, amar aan racfaan lahayn wuxuu u qoondaynayaa shayga dhinaca codsaday.

## Cutubka 5aad

Xoola-tirka Hantida aan Qaybsami karin

## Qod. 65
## La Wareegid

Hantida aan qaybsami karin waa la rahmi karaa xitaa marka milki-wadaagga idil aanay wajibaad ku lahayn qofka wax codsaday.

Markaaso kale, Garsooraha, dekereetada oggolaashaha ama rahanta ku xusan qod 15, wuxuu qabanayaa fadhi ay ka soo qaybgalaan daneyeyaasha si loogu sheego tallaabooyinka ku xusan qodobka soo socda, iyadoo milki-wadaagga lagu amrayo in aan loo gaar yeelin dayn-qabaha qaybtiisa, haddii aan amar laga helin Maxkamadda.

Kaaliyaha waa in uu wargeliyaa dayn-qabaha iyo milki-wadaagga nuqul ka mida cabashada iyo dekereetada ku xusan faqradda sare ugu yaraan toban cisha ka hor muddada la qabtay.

Isla muddadaas Kaaliyuhu wuxuu wargalinaya dekeretda dadka daneynaya.

## Qod. 66
## Qaraarada Garsooraha

Fadhiga la muddeeyay, Garsooruhu wuxuu ka soocayaa cayn ahaan qaybta u sugnaatay dayn-qabaha. Haddii kala soocidda aanay suurtagal ahayn wuxuu amrayaa iibka qaybta aan qaybsamayn amase wuxuu amrayaa in la qaybiyo si waafaqsan Xeerka Madaniga, isagoo ku tallaabsanaya diyaarinta iyo ka garniqidda dacwadda ee ku saabsan qaabka caadiga ee dacwo qaadista.

Xaaladdaan ugu dambaysa, fulinta waa la joojinaya illaa la qaybiyo haddii dhinacyadu aanay heshiis ka gaarin ama la gaarin go'aan kama dambays ah. Marka la qaybiyo, hantida loo qoondeeyay dayn-qabaha waxaa la marayaa sida ku xusan cutubyada la soo sheegay, iyadoo ay baaqi si ahaanayso rahantii hantida loo qoondeeyay sida xagga sare ku qoran.

## Cutubka 6aad

Xoola-tirka milkiilaha saddexaad

### Qod. 67
### Hab la Wareegidda

Marka shayga la xoola-tirayo uu yahay hanti rahman ama rahan maguurto ay saarantahay oo ah dayn dad kale leeyahay, amase uu yahay hanti wareejintiisa xagga dayn-qabaha laga noqday khiyaamo awgeed, waxaa lagu dhaqayaa qodobada ku jira cutubyada la soo sheegay, haddii aanay isbaddal ku samayn qodobada xiga.

### Qod. 68
### Wargalinta Amarka

Xoola-tirka markasta waa in ay la socotaa amarka, kaaso lagu dabbaqyo xitaa dhinac saddexaad.

Amarka waa in lagu caddeeyaa hantida kan saddexaad ee la doonayo in la xoolo-tiro.

### Qod. 69
### Qodobada Gaarka

Rahanta iyo guud ahaan qoraallada xoola-tirka waxaa xitaa lagu sameynayaa kan saddexaad, iyadoo lagu dhaqayo dhammaan qodobada la xariira dayn-qabaha, marka laga reebo mamnuucidda ku xusan qod. 56, faqraddiisa koowaad.

## CINWAANKA 3AAD
Is-Hortaagga

### Qod. 70
### Is-hortaagga Fulinta

Marka lagu murmo xaqa qofka wax codsaday si fulinta qasabka lagu sameeyo, is-hortaaggaas waxaa lagu soo gudbinayaa cabasho qoraala Garsooraha.

Isagu wuxuu dekereeto ku muddaynayaa fadhi ay dhinacyadu ku yimaadaan hortiisa. Wargalinta cabashada iyo dekereetada waxaa samaynaya Kaaliyaha.

Diyaarinta iyo ka garniqidda dacwadda waxay ku dhacaysaa qaabka caadiga ee dhagaysiga dacwadda.

**Qod. 71**
**Is-hortaagga Qoraallada Fulinta**

Is-hortaagga ku saabsan saxnaanta qaabka cinwaanka iyo amarka iyo waxa ku saabsan wargalinta iyo samaynta qoraallada fulinta goonida ah oo xitaa ay ku jiraan kuwa khuseeya rahmidda hantida, waxaa lagu keenayaa mudda cayiman – fadhiga koowaad ee dacwadda fulinta e ku xigta wargalinta amarka ama wargalinta iyo samaynta qoraallada goonida ah ee fulinta. Garsooruhu wuxuu is-hortaagga ku go'aaminaya amar aan racfaan lahayn.

**Qod. 72**
**Is-hortaagga Dhinaca Saddexaad**

Dhinica saddexaad oo ku doodaya in uu leeyahay milkiyadda ama xaq kasta oo muuqda uu ku leeyahy hantida la rahmay wuxuu keeni karaa is-hortaag isagoo cabasho u soo gudbinaya Garsooraha ka hor inta aan la la bilaan iibka isla hantidaas.

Garsooruhyu dekereeto ayuu ku muddaynayaa fadhi ay dhinacyadu ku yimaadaan hortiisa, Kaaliyuhuna waa in uu wargaliyaa dekereetada dacwadda.

Haddii fadhiga dhinacyadu ay heshiis gaari wayaan, Garsooruhu wuxuu diyaarinaya oo ka garsoorayaa dacwadda qaab waafaqsan dhagaysiga dacwadda ee caadiga.

**Qod. 73**
**Mucaraad Danbe**

Haddii inta lagu jiro is-hortaagga Garsooruhu aanu joojin hantida maguurtda ama is-hortaagga la keenay isla iibka ka dib, xaquuqda dhinaca saddexaad wuxuu leeyayahay lacagta laga helo.

**Qod. 74**
**Xadka Caddaynta Markhaatiga**

Dhinaca saddexaad oo is-hortaagga keenay xaqiisa markhaati kuma caddayn karo hantida rahman ee taalla gurigiisa ama urur-hantiyeedka daynqabaha, marka laga reebo jiritaanka isla xaqain lagu yeeshay xirfadda ama ganacsiga uu qabto kan saddexaad ama dayn-qabaha.

**Qod. 75**
**Is-hortaagga Xaaska Dayn-qabaha**

Is-hortaagga ma keeni karto xaaska la nool dayn-qabaha, arrin ku lug leh hantida guurtada ee lagu rahmay gurigiisa, haddii aanay ahayn hantida meherka, ama hanti iyadu ay taariikh sugan ku caddaysay in ay lahayd guurka ka hor ama ay ku heshay hibo, ama dhaxal.

**CINWAANKA 4AAD**
Hakinta iyo Baabi'inta Dacwadda

**Qod. 76**
**Xadka Hakinta**

Haddii hakinta aanu xeerku jidaynayn, fulinta khasabka ah laguma joojin karo waxaan ahayn qaraar Garsooraha.

**Qod. 77**

**Joojinta Sababa la Xariira is-hortaagga Fulinta**

Haddii la soo gudbiyo is-hortaagga fulinta si waafaqsan qoodobada 70 iyo 72, Garsooruhu, marka ay jiraan sababo culus, dacwadda waa joogsanaysaa marka dhinac codsado dammaanad ama dammaanad la'aan.

Qaraarka waxaa lagu soo saarayaa amar, marka dhinacyada la dhagaysto. Xaaladaha deg-degga ah, Garsooruhu wuxuu amrayaa in dekereeto lagu joojiyo, iyadoo uu fadhi muddaynayo ay dhinacyadu kaga soo qaybgalaan.

Fadhiga la muddeeyay waxaa lagu soo saarayaa amar

.

**Qod. 78**
**Waxaa ka Ratimaya Joojinta**

Marka fulinta la joojiyo, wax tallaabo ah ee fulineed lama samayn karo, haddii Garsooruhu aanu si ka duwan wax u dhigin.

**Qod. 79**
**Dib u-qaadista**

Dacwadda fulinta waa in dib loo qaadaa muddada go'an ee garsootuhu qabtay.

**Qod. 80.**
**Tanaasulidda**

Dacwaddu waa baaba'aysaa haddii, mutaysiga ka hor ama iibka ka dib, dhinaca wax loo rahmay uu ka tanasulo arrimaha.

Waxaa lagu dhaqaya haddii ay suuurtagal tahay qod. 306 X.H.M.S.

**Qod. 81**
**Raadaddka ka Dhalanaya Baabi'nta Dacwadda**

Haddii baabi'inta dacwadda ay dhacdo ka hor mutaysiga, iyada waxay ka dhigaysaa wax kama jiraan arrimihii la soo qabtay; haddiise ay dhacdo mutaysiga ka dib, lacagta laga helay waxaa la siinayaa dayn-laha.

Xaaladaha xoola-tirka maguurtada, Garsooruhu, amarka ayuu ku caddaynayaa baabi'inta, isagoo amraya in la tirtiro diiwaangalinta rahanta.

Amarku waa cinwaan u taagan baabi'inta.

Marka dacwaddo baaba'do, ilaaliyuhu wuxuu xisaabta ku warejinaya dayn-qabaha, iyadoo laga doodayo laguna xirayo xisaabta Garsooraha hortiisa. Kharashka dacwadda waxaa qaba dhinaca soo qadimay.

Muqdisho, 2 Maarso 1972.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
**S. Gaas Maxamed Siyaad Barre**